Qaybta 3 – Baarista Guud ee looga baahan yahay kawaanada dalka gudihiisa........... 60
Qaybta 4 – Inta ugu yar ee laga dhisi karo kawaanka iyo faahfaahinta dhismaha ....... 61
Qaybta 5 – Awaamiirta Samaynta Kawaanada tuulooyinka........................................ 63
Qaybta 6 – Fara-ku haynta nadaafadda iyo faya-dhowrka ......................................... 64
Qaybta 7 – Faya-dhowrka Dhismaha, Qalabka iyo wixii soo raaca ............................ 66
Qaybta 8 – Baarista hilibka ee jadwalkan.................................................................. 67
Qaybta 9 – Tuurista hilib sadhaysan (wasakheysan) iyo qaybihiisa............................ 68
Qaybta 10 – Dib u baarista hilibka ........................................................................... 69
Qaybta 11 – Calaamadeynta iyo summadeynta hilibka iyo weelka hilibka ................ 69
Qaybta 12 – Diiwaan ................................................................................................ 69
Qaybta 13 – Dhaqan gelinta Lifaaqa 1 ee Jadwalka II .............................................. 69

**JADWALKA III** .......................................................................................... **70**

Qaybta 1 – Gogol Xaar ............................................................................................ 70
Qaybta 2 – Qalabka habaynta digaagga iyo habraacyada........................................... 70
Qaybta 3 – Habka shaqada......................................................................................... 72

**JADWALKA IV**............................................................................................ **79**

Qaybta 1 – Gogol Xaar ............................................................................................ 79
Qaybta 2 – Ruqsada ogolaanshaha safrinta Hilibka, iwm. ......................................... 79
Qaybta 3 – Heerarka faya-dhawrka ee safrinta Hilibka............................................. 82
Qaybta 4 – Qaabka iyo adeegsiga gaadiidka iyo weelka............................................ 84

**JADWALKA V** ............................................................................................ **87**

**JADWALKA VI**............................................................................................ **93**

Qaybta 1 – Gogol Xaar ............................................................................................ 93
Qaybta 3 – Waxyaabaha looga baahan yahay habeynta hilibka la Qasacadeenayo ..... 94
Qaybta 4 – Calamadeynta iyo Sumadeynta Weelasha Hilibka, Kuwa Wax lagu duubo iyo kuwa lagu qardaaseeyo ............................................................................ 96

**JADWALKA VII**.......................................................................................... **97**

**JADWALKA VIII** ........................................................................................ **100**

**JADWALKA IX**........................................................................................... **101**

**Xeerka Baarista iyo Maamulka Xeerarka Kawaanada Gowraca Xoolaha Ee Hilibka Dibedda Loo Dhoofiyo**

**Qaybta 1 -- Gogol Xaar**

**Tixraac**

1. Xeerkan waxaa loogu yeeraa xeerarka baarista iyo maamulka hilibka (kawaanada gowraca ee hilibka dibedda loo dhoofiyo).

   Shaacinta kawaannada gowraca xoolaha ee hilibkooda dibedda loo dhoofiyo iyo arrimaha la xiriira

2. (a) Wasiirku wuxuu xeer ku shaacinayaa derajada iyo heerarka kawaannada gowraca xoolaha, si loogu aqoonsado kawaannada gowraca xoolaha ee loogu talagalay diyaarinta hilibka la dhoofiyo.

   (b) Wasiirku waa inuu wakhti ilaa wakhti soo saaraa dikreeto ay ku qoran tahay howsha iyo warbixinta loogu talagalay dhamaan baarayaasha caafimaadka xoolaha, shaqaalaha iyo dadka kale ee howshan ku howlan, baahida Hay'adda caafimaadka xoolaha ee caalamiga ah (OIE Codex) ee ah nadaafadda, fayadhowrka hilibka iyo badbaadada hilibka;

3. Awaamiirta ku qoran jadwalkan waa in lagu dabakhaa howsha ka socota kawaannada gawraca ee hilibkooda la dhoofiyo sida lagu soo shaaciyey xeerka 2 ee xeerarkan, inkasta oo xad u yeelidii hore ee kawaanada lagu gawraco xoolaha hilibkooda la dhoofiyo ee sida gaar ah lagu soo sheegay xeerarkan ama dikreetada wasiirka, xeerarkan waxay dabakhi karaan waxyaabaha dib loo habeeyay haddii ay lagama maarmaan noqoto derajooyinka iyo heerarka kawaannada gowraca xoolaha;

4. (1) Qofna kuma gowrici karo kawaanada xoolaha hilibkooda la dhoofiyo xoolo uusan soo baarin baaraha caafimaadka hilibka, marka laga soo reebo xaaladaha deg degga ah oo la soo marinayo xoolaha baaris gowraca ka hor;

   (2) Waa waajibaadka qofkasta oo shaqaale ah inuu la sameeyo qorshe kasta oo lagama maarmaan ah baaraha ku qoran kawaankiisa, si uu u sameeyo baarista caafimaadka xoolaha gowraca ka hor iyo baarista neefka gowraca ka dib, shaabadaynta iyo caddeynta baarista, summadda weelka, xirmaynta iyo oggolaanshaha rarka iyo arrimaha kale ee looga baahan yahay xeerkan.

   (3) Howlwadeen kasta waxaa kale oo uu qabanayaa:

   (a) Wuxuu sameynayaa qorshayaal macquul ah oo uu ku da-dejinayo baarista caafimaadka xoolaha gawraca ka hor ee la keenay kawaankiisa: iyo

(g) Xaqiijinta summad kasta oo lagu dhejiyo oo ku daabacan summad caafimaad in la isticmalo marka uu amar adag ka baxsho baaraha caafimaadka xooluhu;

(h) Inuu xaqiijiyo in deg-deg loo ogeysiiyey warbixinta meelaha uu ku ururiyo qashinka maamuluhu, ay soo wajahday wax khatar ku ah caafimaadka;

(i) Inuu hayo diiwaanada muddo shan sano sida xeerkan qeexayo ama mudda kale oo Agaasimuhu caddeeyo;

(j) Inuu diyaariyo barnaamij tababar shaqaale oo ah ku dhaqanka shuruucda fayadhowrka kawaanka, lana tashato baaraha caafimaadka hilibka iyo sarkaal ka socda caafimaadka guud dadka ama saraakiisha kale ee ay khusayso arrintani.

(k) Inuu guto howlaha kale ee uu u baahdo Agaasimuhu wakhti ilaa wakhti;

(2) Mas'uul kasta oo ka soo bixi waaya inuu ku dhaqmo awaamiirta firqada (1) ee habraacan wuxuu galay gef/dembi waana loo ciqaabayaa

**Qaybta 8 – Baarista caafimaadka xoolaha gawraca iyo hilibka**

**Qaybta 8.1 – Nidaamka Guud ee Baarista**

1. Baaraha caafimaadka xooluhu, isagoo u adeegsanaya hab cilmiyeysan baarista caafimaadka hilibka wuxuu ugu horreyn sameynayaa baarista xoolaha loo keenay qalliinka kawaanka, ujeedada kowaad ee laga leeyahay waxay tahay in la xaqiijiyo in xoolaha la keenay kawaanka ay yihiin kuwo aragtida guud caafimaad qaba iyo inay yihiin kuwa shuruud la'aan ku habboon in la qalo.

2. Isla marka la gawraco xoolaha soo maray baarista caafimaad gawraca ka hor, baaraha caafimaadku wuxuu samaynayaa baarista caafimaad ee xoolaha la gawracay ka dib, ujeedada koowaad ee laga leeyahay baaritaankan waxay tahay in la xaqiijiyo hilibka neefka la qalay, xubnaha hilibka ee aan la cunin iyo dhammaan waaxyaha neefka la qalay inay ka caafimaad qabaan cuduro kana muuqan wax isbadal ah, yihiinna kuwa la quudan karo;

3. Iyada oo uusan dhaawaceyn waxyaabaha looga baahan yahay nidaamka baarista ee ku xusan jadwalkaan, baarista caafimaad "Post Mortem" ee la sameeyo gawraca ka dib waxaa ka mid ah:

   (a) Aragtida muuqaalka guud ee xubnaha neefka la gawracay;
   (b) Taabasho/ Tuujin; iyo
   (c) Xubno Jeexid/Goyn iyo Baaris;

4. Baaraha caafimaadka hilibka xooluhu wuxuu qaban karaa nidaam kasta oo u gaar ah oo u ku baarayo neef kasta oo la qalo qaybihiisa, ama xubnaha xoolaha kala gaddisan ee ay saameeyeen cudurro aan caadi ahayn sida duruufuhu oggol yihiin;

# JADWALKA VIII

## DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

## XEER NO.....................................................................

**Xeerka Baarista iyo Ilaalinta Hilibka, No...........ee.......... [Sanadka]**

Iyada oo la adeegsanayo awoodaha ku xusan Qodobka 18 (1) (n) ee Xeerka Baarista iyo Ilaalinta Hilibka............ [Sanadka], Wasiirka iminka haya adeega caafimaadka xoolaha waa in uu soo saara xeerarkan:-

**Xeerka Baarista iyo Ilaalinta Shuruucda (Khidmada Baaritaanka)**

1. Xeerkan waxaa loogu yeeraa Xeerarka Baarista iyo Ilaalinta (Khidmada Baaritaanka).

2. Ereyada iyo oraahyada gaagaaban ee halkan lagu adeegsanayo waxay la micna yihiin macnaha xeerkan looga yaqaan.

3. In Wasiirka uu ka tanaasulo ma ahee, waa in dowladda la siiyaa lacag yar oo khidmad ah oo ku saabsan baaritaanada Caafimaad ee lagu sameeyo xoolaha la gawraco sida ku qoran xeerkan, lacagtaas khidmada oo leh qiimo kala duwan neefkiiba waa sedan hoos ku xusan:-

| | | Shs. | Cts |
|---|---|---|---|
| 1. | Lo'da | ........................................ | |
| 2. | Iddaha | ........................................ | |
| 3. | Riyaha | ........................................ | |
| 4. | Diggaaga | ........................................ | |
| 5. | Geella | ........................................ | |

4. Lacagtan khidmada ah waxaa qaadaya baaraha caafimaadka hilibka iyada oo naqadi (Cash) ah markuu samaynaayo baaritaanka. Haddii wax kale lagu bixinaayo waa in laga heshiiyaa hadba sida duruufuhu saamaxaan.

5. Wixii ribo ah waxaa diidaya Shareecada Islaamka, laakiin khidmada baaritaanka waxa gownaya wasiirka .

cusboonaysiin karaa, joojin karaa, beddeli karaa ama uu hakin karaa sida xeerkan ku cad haddii xaalku yahay:-

2. Waxyaalaha ku qoran qaybaha 12 iyo 13 ee xeerkan waa in loo adeegsadaa dhammaan xaaladaha la xiriira araajida codsiga, ruqsad bixinta iyo wixii kale ee la xiriira jadwalkan.

3. Haddii Agaasimuhu amar ku bixiyo in la xiro kawaan sida xeerkan tilmaamayo waa in markiiba laga qaado ruqsaddii hore loo siiyey.

4. Qof kasta oo ku shaqeysta kawaan bilaa ruqsad ah ama u adeegsada ruqsada sida xeerkani uu sheegayo ruqsada wuxuu gelayaa gef/dambi-waana lagu qaadayaa dambiga uu galay....................waxaana si deg deg ah looga xirayaa kawaankiisa.

5. Mas'uul kasta oo beddela dhismaha kawaankiisa ama u rara meel cusub oo u dhow kawaankiisa hore, isaga oo aanay ruqsadiisu dhicin wuxuu isticmaalayaa ruqsadiisii hore inta ka hartay jiritaankeeda, waa in uu ogaysiiyo xafiiska ruqsad bixinta kawaannada meesha uu u raray kawaankiisa.

6. Qof kasta oo ku xadgudba shuruucdan ama qayb ka mid ah wuxuu gelayaa gef/dembi-waana lagu qaadaya dambiga uu galay....................

**Qaybta 3 – Baarista Guud ee looga baahan yahay kawaanada dalka gudihiisa**

1. Amarrada Jadwalka 1 ee qaybta 2aad iyo qaybta 5 haddii aanu wasiirku wax ka beddelin isaga oo u arkay lagama maarmaan, baarista hilibku waa sida ku cad jadwalkan.

2. Inkasta oo aan mawduucan ku soo sheegnay qaybta 2 iyo 5 ee jadwalka 1, haddana waxaa jadwalkan lagu caddeynayaa si loo saaro shakiga in jadwalkan loo isticmaalayo baarista hilibka kawaanada dalka gudihiisa.

3. Kawaan kasta oo la diiwaan geliyey, waa in la siiyo lambarka diiwaan gelinta rasmiga ah, si loogu aqoonsado xoolaha lagu qalay iyo hilibka lagu diyaariyey kawaankaas.

4. Agaasimuhu waa inuu joogteeyaa diiwaan uu ku qoro magacyada maamulayaasha kawaanada dalka gudihiisa, taariikhda la diiwaan geliyey, ruqsadaha iyo meelaha ay ku yaalaan, mugooda, socodsiinta shuruucda iyo haddii wax degniin ah la siiyey mar uu xeerkan ku xadgudbay sanadka dhexdiisa.

5. Qof kasta oo carqaladeeya, ama gacan ka geysta carqaladaynta baaraha hilibka xiliga uu shaqada ku jiro wuxuu gelayaa dambi.

6. Baare kasta oo hilib baare ah, marka uu baarista ku jiro ee xeerkan uu fulinaayo waa in uu geli karo qayb kasta oo kawaanka ka mid ah kumana xirna in kawaanku shaqeeyo iyo in kale.

(j) Ma burburin karo xubnaha qiimaha leh ee neefka la qalay marka u samaynayo jeexida baarista xubnaha.

(k) Mar kasta baaruhu waa inuu kormeeraa bugaagta iyo diiwaannada loo baahan yahay inuu hayo maamulaha kawaanku, sida xeerkan ku qoran; iyo

(l) Waa inuu sameeyaa wax kasta oo kale oo looga baahan yahay in uu sameeyo sida u qeexayo xeerkan;

(2) Agaasimuhu waa inuu ka qaataa go'aan adag oo ku habboon baaraha xoolaha ee ku xadgudba awaamiirta xeerkan, ama ku fashilma ama dayaca gudashada waajibaadkiisa ee xeerkan hoos yimaada; haddii baaraha caafimaadku uu xubin ka yahay (ka tirsan yahay) Agaasimaha ama qof kasta oo kale waxay u sheegi karaan ururka uu ka tirsan yahay in uu ka qaado tallaabooyinka ku habboon oo ciqaab ah Sarkaalkaas.

3- Waa in loo gawracaa hab shareecada waafaqsan

**Waajibaadka Mas'uulka Kawaanka Gawraca Xoolaha**

1. 3. (1) qaadista talaabooyin uu ku xaqiijinayo in shaqaalihiisu ku dhaqmaan habraacan

(a) Inuu haysto diiwaan rasmi ah oo ku muujinayo tirada xoolaha loo keenay qalliinka kawaankiisa, tirada xoolaha la diiday in la qalo haddii ay jiraan, iyo inta kg oo hilib cusub ah ee laga raray kawaankiisa toddobaadkiiba iyo cidda loo raray. Haddii duruufuhu saamaxaan inta shixnadood ee uu raray wakhtiyada gawracu jiro;

(b) Inuu qaado tallaabooyin kasta oo uu ku xaqiijinayo in shaqaalaha, wakiilada ama qof kasta oo ku casuuman kawaanka inay ku dhaqmaan waxyaabaha looga baahan yahay xeerkan;

(c)Inuu xaqiijiyo in baaraha caafimaadka xoolaha la siiyey agab ku filan oo uu la guurguuri karo diiwaan gelin iyo wacyigelin shaqaalena sameeyo

(d) Inuu qaado tallaabooyinka lagu xaqiijinayo habsami u socodka shaqada kawaanka, fulinta shuruudaha habraacan iyo dabagalkiisa

(e) Inuu hayo natiijada diiwaanka ee dabagalka ku samayey ee ku xusan farqada (d) iyo inuu ka helo baaraha caafimaadku marka uu codsado;

(f) Inuu ku kaydiyo diiwaan natiijada baarista biyaha, saabuunta, walxaha kimikaalka ah iyo walxaha fayadhowrka ee looga baahan yahay ahbraaca, natiijaduna waa in ay diyaar u tahay baaraha caafimaadka.

(e) Xoolo ku soo dhintay intay safarka ku jireen ama intay ku jireen xerada nasashada kawaanka ee sugayey baarista caafimaadka gawraca ka hor. Raqda xoolahaas waa in laga saaraa kawaanka iyo baabuurka, waxaana lagu tuurayaa meelaha uu ku taliyo baaraha caafimaadka xooluhu. Si kasta ha ahaatee, xoolaha dhinta inta lagu jiro baarista gawraca ka hor waxaa lagu dhaqmayaa sida ku qeexan qodobada xeerkan;-

(f) Xoolaha gawraca uu ka joojiyey baaraha caafimaaku si ay u soo dhammaystaan baarista gawraca ka hor;

(g) Xoolo aan la garanayn meesha ay ka yimaadeen ama cidii lahayd;

(h) Xoolo muran ka taagan yahay ama la isku haysto;

(i) Xoolo laga saaray haddana lagu soo celiyey xeryaha lagu hayo baarista gawraca ka hor, kuwaas oo uusan ogeyn, oggolaanna baaraha caafimaadka xooluhu. Waa inuu amraa baaraha caafimaadku in xoolahaasi laga saaro kawaanka, maamulaha kawaankuna fuliyaa amarka.

(j) Xoolaha inta lagu jiro baarista noqda kuwo aan daganeyn oo dhib badan, khatarna gelin kara baaraha caafimaadka, qof kasta oo ku jira kawaanka, xoolaha kale ee uu ku dhex jiro. Haddii dhacdadan ay jirto, xoolahaas waxaa lagu go'doominayaa awaamiirta baaraha caafimaadka xoolaha, waxaana loo go'doomiyaa in la ogaado daganaasha la'aantu inay la xiriirto cudur ama wax kale. Intaa ka dib baaraha caafimaadku waa inuu qaataa go'aanka ku habboon.

(2) Neef kasta oo qaab dhismeedkiisu dhammayn, laangare ah (dhutinaya) ama indhaha wax ka qaba sababtaas keliya darteed loogama joojin karo gawraca, haddii qaab darrada, dhutin ama indha la,aantu sida ku xusan xeerkan, aysan muujinaynin calaamado cudur ama xaalad kale oo saamayn ku yeelan karta guud ahaan hilibka sida uu yahay.

5. Waa gef/dambi in lagu xadgudbo awaamiirta xeerkaan.

**Qaybta 7 – Waajibaadka baaraha caafimaadka hilibka iyo Maamulaha kawaanka Gawraca xoolaha**

**Waajibaadka baaraha caafimaadka hilibka:**

1. (1) Iyada oo uusan dhaawacayn waajibaadka iyo mas'uuliyadda saaran baaraha caafimaadka hilibka ee hoos imaanaya xeerkan ama xeer kale oo dejisan baaraha caafimaadku waa in uu:

(a) Inuu hubiyo in mas'uul kasta ku dhaqmay, dhowray, raacay, ilaaliyey hab-sami u socodka barnaamijka faya-dhowrka ee kawaankiisa, isagoo eegaya heerka faya-dhowrka shaqaalaha, agabkiisa, qalabka iyo kawaanka laftiisa (gudo iyo dibadba), xirmaynta, weelka qashin qubka, raridda iyo safrinta

## TUSMO

### Qaybaha

**QAYBTA I – GOGOL XAAR** .......... 4
Turjumida Ereyadda .......... 4
**QAYBTA II – ILAALINTA FAYA-DHOWRKA IYO AHMIYADAHA KALE EE GAWRACA XOOLAHA KA HOR** .......... 7
Faya-dhowrka khuseeya wax soo saarka asaasiga ah. .......... 7
Faya-dhowrka calafka xoolaha .......... 8
Faya-dhowrka deegaanka .......... 8
Faya-dhowrka xoolaha loo wado kawaanada gawraca .......... 9
Faya-dhowrka xoolaha inta lagu jiro gawraca iyo qalliinka xoolaha .......... 9
**QAYBTA III –XEERKA MAAMULKA EE LA XIRIIRA RUQSAD SIINTA** .......... 10
Maamulka .......... 10
Ka hor tegidda mabaa'dida khatar gelin karta fayo-dhowrka .......... 11
Dabagalka xafidaada diiwaanka iyo warbixinaha silsilada cuntada .......... 11
Shuruudaha Looga Baahan Yahay Ruqsada Dhisme Kawaan .......... 12
Baahida Ruqsad Helid Ka Hor Inta Aan La Hawl Gelin Kawaanka .......... 13
Codsiga bixinta ruqsada .......... 13
Muddada badalaada ruqsada IWM .......... 14
**QAYBTA IV – ADEEGYO KALA DUWAN** .......... 16
Sugidda Hilibka Macaamiisha .......... 16
Kala Saarida iyo Cadeymaha Kawaanka Gawraca Xoolaha .......... 16
Xuquuqda Saraakiisha .......... 16
Awoodda Amar bixinta Qawaaniinta .......... 17
**JADWALKA I** .......... 18
Qaybta 1 – Gogol Xaar .......... 19
Tixraac .......... 19
Qaybta 2 – Faya-dhowrka iyo badbaadada safrinta xoolaha Gawraca .......... 22
Qaybta 3 – Baahiyaha Kawaanada Gawraca xoolaha Hilibkooda la dhoofiyo Qalabkooda iyo meelaha ay ku kala yaalaan .......... 24
Qaybta 4 – Nadaafada Qofka .......... 28
Qaybta 5 – Baahiyaha Nadaafada iyo dhismayaasha shaqalaaha .......... 30
Qaybta 6 – Hannaanka Gawraca Xoolaha .......... 30
Qaybta 7 – Waajibaadka baaraha caafimaadka hilibka iyo Maamulaha kawaanka Gawraca xoolaha .......... 32
Qaybta 8 – Baarista caafimaadka xoolaha gawraca iyo hilibka .......... 35
Lifaaqa 1 .......... 49
**JADWALKA II** .......... 59
Qaybta 1 – Gogol Xaar .......... 59
Qaybta 2 – Ruqsada kawaanka dalka gudihiisa .......... 59

